

Tusaalooyinka arrimaha ay Xarunta dhexe gargaar ka bixin karto:



Si aad macluumaad dheeraad ah u hesho, la xiriir Isuduwahaaga xarunta dhexe ee Taageerada Qoyska ee xaafadda.



Belfast Family Support Hub Network

- Caafimaadka iyo Wanaagqabka Shucuureed
- Taageerada Waalidnimada
- Taageerada Qoyska
- Talada Dheefaha
- Taageerada Dhallinyarada
- Talada & Hagista
- Waxbarashada
- Gardaadinta
- Taageerada Dhallinyarada
- Taageerada Habdhaqanka

Waa maxay Xarunta dhexe ee Taageerada Qoyska (Family Support Hub)?

- Xarunta dhexe ee Taageerada Qoyska waxaa iskugu yimaadda ururrada taageero ugu deeqi kara qoysaska haysta carruur (0-18 sano). Waxaa tan ka mid ah ururrada bulsho, qaanuuni iyo samafal ama mutaddawacnimo.
- Xarunta dhexe ee Taageerada Qoyska waxaa loogu kulmaa bishiiba mar, si codsiyada taageerada ee qoysaska ka yimaadda, loogu toosiyo adeegga(yada) ugu habboon.
- Xarun kastoo dhexe waxay leedahay Isuduwaha (Co-ordinator) oo aqoon fiican ka haysta adeegyada taageerada ee xaafadda ee loogu talagalay qoysaska oo adiga iyo qoyskaaga wadajir idiinla shaqayn doona si uu idiinla xiriiriyo taageerooyinka ugu habboon.

Isuduwahaaga Xarunta dhexe ee Taageerada Qoyska ee xaafaddu waxuu fahansan yahay...

- Abaalmarinta ama faa'iidada farabadan ee waalidnimada ka iman karta laakiin weliba taxaddiga badan ee lagala kulmi karo.
- Firqoonida ay leedahay nolasha qoysku iyo in ay mararka qaar diiqad ama buuq maskaxeed u keeni karto xubnaha qoyska ee maamula cadaadisada ka yimaadda nolol maalmeedka.
- Wey adak tahay mararka qaar in la ogaado halka taageero loo doonan karo.

Haddii aad go'aansato in aad taageero ka codsato Xarunta dhexe ee xaafaddaada...

- Baahiyaha qoyskaaga ayaa diiradda la saari doonaa.
- Waxaa la soo bandhigi doonaa fursadaha taageerada ee la kala dooran karo.
- Waxaa lagula xiriirin doonaa taageerooyinka xaafadda ka jira, ee ku habboon baahiyaha qoyskaaga.
- Xarunta dhexe waxay marwalba ku dhaqmi doontaa hab xirfadlenimo ku dheehan tahay waxayna xushmayn doontaa sir ilaalinta.

Yaa gudbin u diri kara xarunta dhexe?

- Qof kastoo qoyska ka mid ah ayaa taageero ka codsan kara Xarunta dhexe (Hub).
- Codsiga lagu rabo taageerada waxaa weliba diri kara, marka aad rukhsayso, qof hore adiga kuula shaqeeya. Tusaale ahaan, dugsiga ilmahaaga, koox bulsho oo xaafadda ka diyaar ah ama Booqdahaaga Caafimaadka (Health Visitor).
- Mar kaste Foomka Codsiga Adeegga (Service Request Form) waa in uu saxiix qof habboon oo qoyska ka mid ah, si uu u xaqiijiyo in uu ku faraxsan yahay in gudbinta lagu dhaqaaqo.

Yaa lala wadaagi doonaa macluumaadkayga?

Macluumaadka oo dhan waxaa looga shaqayn doonaa hab sir ah. Macluumaadka muhiimka ah oo keliya ayaa lagaga hadli doonaa kulanka lagu yeesho Xarunta dhexe ee Taageerada Qoyska iyadoo lagala hadli doono ururrada xubin ka ah Xarunta dhexe, waxaana looga hadli doonaa hab aanan la idinku garan karin adiga ama qoyskaaga. Macluumaadka aad ku bixiso Foomka Codsiga Adeegga waxaa lala wadaagi doonaa oo keliya adeegbixiyaha(yeyaasha) aad adigu go'aansato in uu yahay midka adiga kuugu fiican. Foomka Codsiga Adeegga lama aqbali doono haddii uusan lahayn saxiix xaqiijinaya oggolaanshahaaga (waalidka / daryeelaha ama qofka yar).

Sidee ayay u hirgeli doontaa?

1

Adiga laftigaaga ayaa buuxin kara Foomka Codsiga Adeegga ama qof kale ayaa magacaaga tan ku samayn kara, marka aad rukhsayso, tusaale ahaan, dugsi, koox bulsho, ama Booqdaha Caafimaadka.

2

Isuduwaha Xarunta dhexe ayaa helaya codsiga adeegga wuuna kula soo xiriiri doonaa, si uu kaala hadlo waxa aad u aragto in ay ugu fiican tahay, si adiga iyo qoyskaaga la idiin taageero.

3

Si loo caawiyo in adiga lagula xiriiriyo taageerooyinka habboon, macluumaadka muhiimka ah ayaa lagaga hadli doonaa kulanka lagu yeesho Xarunta dhexe ee Taageerada Qoyska, waxaana looga hadli doonaa hab aanan la idinku garan karin adiga ama qoyskaaga.

4

Isuduwaha Xarunta dhexe ayaa la xiriiri doona adeegyada xaafadda ka jira ee suurogal ah in ay adiga iyo qoyskaaga idin taageeraan. Wadahadalladani waa kuwo lagu guudmari doono oo keliya baahiyaha la soo ogaaday iyo adeegga loo baahan yahay. Macluumaadka qoyska ee gaarka ah waqtigan lama sheegi doono.

5

Haddii aad rabto in aad qaadata adeegyada la soo bandhigay, Foomka Codsiga Adeegga ayaa, marka aad rukhsayso, loo gudbin doonaa ururka habboon oo adiga kula soo xiriiri doona si uu u qaban qaabiyo in uu adiga kula kulmo si aad ugu heshiisaan taariikhda bilowga.